

Cudurka Pneumococcal ee ilmanimda

Somali

Jadwalka barnamijka Talaalka ee Qaranka ayaa siiyaa talaal lacag la'aanta ah oo pneumococcal dhamaan carruurta jirta labo, afar iyo laba iyo toban bilood. Carruurta ka yar shan sanadood oo qaba xaallad caafimaad ayaa iyaguna mudan in la siiyo qadar siyaada ah oo talaalka pneumococcal.

Cudurka pneumococcal

Cudurka pneumococcal ee carruurta yaryar wuxuu keena jira aad u xun ama xataa dhimasho. Ilmaha qaba xaallad caafimaad oo aad u daran wuxuu khatar ugu jiraa infakshan helis ah iyo in isbitaal la dhigo.

Dadka badankood waxay qabaan Streptococcus bakteeriya pneumonie oo gala sanko iyo cunaha. Bakteeriyada waxaa fidiya wax yar oo ka yimaada afka ama sanko sida qufaca iyo hindhisada ama adoo ay ku soo gaaraan walxo sumaysan.

Infakshanka Pneumococcal wuxuu weeraraa qaybo kala duwan oo jirka ah. Tusaale:

- Haddii bakteeriyada pneumococcal ay gasho dhiigga waxaa la yiraahdaa bateraemia
- Haddii ay weerarto qayb ka mid ah maskaxda, waxaa loo yeeraa meningitis
- Haddii bakteeriyada pneumococcal ay weerarto sanbabka, waxaa loogu yeeraa pneumonia
- Haddii ay ku dhacdo dhegaha, waxaa loogu yeeraa otitis media.

Talaalka pneumococcal

Talaalka carruurta ayaa loo muujiyey inuu yahay 100% wax ku ool ka dhan ah qaababka xun ee cudurka pneumococcal. Si kasta ha ahaatee waxaa jira in ka badan 90 nooc oo ah cudurka pneumococcal. Hal talaal oo pneumococcal ah ayaa daboolaa noocyo keena ilaa 80% ilaa 90% oo ah cudurada xun ee pneumococcal. Talaal kale oo pneumococcal ayaa ku haboon carruurta waaweyn haddii ilmuhu qabo xaallad caafimaad oo kale, maadaama ay ka kooban tahay noocyo kaa difaacaya infakshanka pneumococcal. Talaaladu waxay ka kooban yihiin curiyayaal aan kacsanayn oo noocyada bakteeriya pneumococcal si ay u kiciso qaabka difaaca jirka.

Yaa mudan talaalka lacag la'aanta ah?

- Dhamaan carruuraha jira labo, afar iyo laba iyo toban bilood.
- Carruurta jirta ilaa shan sanadood oo qaba xaallad caafimaad oo khatara oo keeni karta khatarta infakshanka pneumococcal. Carruurtaani waxay u baahan yihiin qadar talaalka pneumococcal ah oo siyaada ah markay jiraan lix bilood iyo markay jiraan afar ilaa shan sanadood.

Fadlan wac dhakhtarkaaga si aad ugala hadasho xaalladaha ay ka midka yihiin:

- Infashanka HIV
- Dhiigga xun
- cystic fibrosis
- Daadashada CSF
- Dalool lafta madaxa ah
- Ku rakibida cohlear
- Daciifnimada difaaca jirka oo ka timid jirada, daawada ama daaweynta
- Shaqada xamayti ciladaysan ama aan jirin
- Down syndrome

- Dhamaan carruurta ku dhalatay in ka yar 28 asbuuc
- Cudur khatar ah oo wadnaha, sanbabka, kelyaha iyo sonkorowga ah.

© Xuquuqda daabacada Wasaarada Caafimaadka Health 2010.
Waxaa ansixisay Xukuumada Fiktooriya, 50 Lonsdale Street,
Melbourne.
Janaayo 2011. Tel: 616 (1011012)

Dhibta ka iman karta talaalka pneumococcal

Dhibta guud

- Xanuun, guduudasho iyo barar barta talaalka
- Xaraarad aad u hoosaysa

Dhib aad u daran oo ka timaada talaalka

- Xasaasiyad aad u daran

Haddii ay dhacdo xasaasiyad u daran, dhibta hoos ayaa loo dhigi karaa iyadoo:

- La saarayo dhar qoyan barta xanuunsan
- Iyada oo aan ilmaha dhar badan loo gelin
- Waxaa laga yaabaa in loo baahdo paracetamol si hoos loogu dhigo dhibta yar iyo/ama qandho sarraysa (iska hubi si aad si fiican ugu isticmaasho)
- Siinta ilmaha biya siyaada ah oo uu cabo.

Haddii dhibta talaalku daran tahay ama joogto tahay, ama haddii aad ka welwelsan tahay ilmahaaga, la xiriir dhakhtarkaaga ama isbitaalka.

Waxyaallaha la eegayo talaalka ka hor

Ka hor intaan la talaalin ilmahaaga, u sheeg dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka haddii ilmahaagu:

- Aanu fiicnayn maalinta talaalka
- Uu xassasiyad daran u leeyahay talaal uun
- Uu xasaasiyad u leeyahay mid ka mid ah curiyayaasha talaalka

Macluumaad intaas ka badan

Macluumaad baaritaan oo intaas ka badan 'talaalka ilmanimada oo ku yaalla www.betterhealth.vic.gov.au

Waxyaallaha la tarjumay ee dukumintigaan gal www.healthtranslations.vic.gov.au

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Barnaamijka Talaalka Qaranka booqo www.immunise.health.gov.au/



Translating and interpreting service
Call 131 450